



MAJALADA

# ARIMAHA GUDAHA

BILLE, CADADKA 8-AAD, SEPTEMBER 2023



**"WAXAAD KU JIRTAAN DAGAAL WAAFAQSAN  
MABAADI'DA SHAREECADA ISLAAMKA"**



[WWW.MOIFAR.GOV.SO](http://WWW.MOIFAR.GOV.SO)



**"WAXAAD KU JIRTAAN DAGAAL WAAFAQSAN  
MABAADI'DA SHAREECADA ISLAAMKA"**

www.moifar.gov.so



Madaxweyne Dr. Sheekh oo Dardargelinta Ladagaalka Khawaarijta u tagay Maxaas iyo Aadan Yabaal



Page 5

New York: Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre oo khudbad ka jeediyay Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay

Muqdisho: Mas'uuliyiin uu ugu Horreeyo Ra'isul Wasaare Xamse Barre oo Kaqeybgalay Shirweynaha Aqoonsiga Qaran oo 2 maalin Socday **P.7,8**

Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka oo Daahfuray mashruuca ka jawaabista xaaladaha degdegga **P.6**

Talyaanig: Mudane Fiqi oo Dhiggiisa Matteo Piantedosi Kala Hadlay Xiriirka Labada dal iyo Arrimo Kale **P.14**

Palermo: Wasiir Fiqi oo Kaqeybgalay Xuska 20 sano guurada heshiisiinta O/M ee ka dhanka ah dambiyada abaabulan ee ka gudba Xuduudaha **P.13**

Wasiirka Arrimaha Gudaha oo USAID Kala Hadlay Qodobbo Muhiim ah **P.14**

Mudug: Kulammo Kala Duwan oo Dhaxemaray Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Macawisleyda Beelaha Saruur, Saleebaan iyo Waceysle **P.10,11**

Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya Mudane Fiqi oo Qaatay Kaarka Aqoonsiga Qaranka **P.12**

Shabeelow: Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya Mudane Axmed Macallim Fiqi oo Booqday Furimaha Dagaalka **P.17**

Xarardheere: Wasiir Fiqi oo Maamulka iyo Bulshada Degmada Ka Dhageystay Baahiyada Jira **P.16**

Garoonka Xarardheere oo Khawaarijta Kadib Ku Cayaareen Gorgor iyo Xulka Degmada iyo Mudane Fiqi oo u Daawasho Tagay **P.14**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo Ku Daahfuray soo bandhigidda natijada qiimeynta barnaamijka (I-Stand) ee Xasillinta. **P.23**

Wasiiru dowlaha Wasaaradda oo Guddoomiyay Kulan Looga Tashtay madasha caalamiga ah ee arrimaha qaxootiga **P.20**

Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Ashkir oo Kaqeybgalay Tababar Xiriirka ah oo ay Wasaaraddu u Qabatay Hey'adaha Hoostaga **P.21**

Agaasime Caydaruus oo Soo Xiray Shir Looga Arrinsaday Madasha Caalamiga ah ee Arrimaha Qaxootiga 2023 **P.21**



Page 4

Hoggaanka Dowladda Federaalka ah oo Qaatay Kaarka Aqoonsiga Qaranka





## Madaxweyne Dr. Sheekh oo Dardargelinta Ladagaalka

### Khawaarijta u tagay Maxaas iyo Aadan Yabaal

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud oo ka duulaya dardargelinta howgalada ciribtirka Khawaarijta ayaa gaaray degmada Maxaas ee gobolka Hiiraan oo ka mid ah deegaanada udub dhexaadka u ah halganka dib u xoreynta dalka.


Inta uu halkaasi joogay, waxaa uu kormeeray xerada ciidamada Guutada Cali binu Abii daalib ee degmada Maxaas isaga oo bogaadiyey guullaha waaweyn ee ay ka soo hoyeen dagaalka Khawaarijta, waxaa uuna kula dardaarmay in aysan marnaba is-dhigan oo ay isha ku hayaan cadawga.



Waxaa kale uu kulamo kula qaatay siyaasiyiinta, waxgaradka iyo odayaasha dhaqanka ayaa isku afgartay in loo midoobo dagaalka lagu ciribtirayo Khawaarijta. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr.



Xasan Sheekh Maxamuud degmooyinka ayaa dhanka kale booqday degmada Aadan Yabaal, isaga oo u kuurgalay xaaladda ciidamada qaranka iyo kuwa halyeeyada shacabka ee ku howlan dib u xoreynta dalka ayaa soo gaaray degmada Aadan-yabaal ee gobolka Shabeellaha Dhexe.



# Hoggaanka Dowladda Federaalka ah oo Qaatay Kaarka Aqoonsiga Qaranka

Hey'adda Aqoonsiga Qaranka iyo Diiwaangelinta ayaa September daahfurtay kaarka aqoonsiga, iyaga oo magaalada Muqdisho ku qabatay shir labo maalin socday oo la xiriira arrinkan.

Waxaa xusid mudan in kaarka aqoonsiga ay qaateen madaxda ugu sareysa dalka sida; Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya mudane Xasan Sh. Maxamuud, Ra'isul Wasaare Xamsa Cabdi Cabdi Barre, Guddoomiyeyaasha Golaha Shacabka Sheekh Aadan Maxamednuur Madoobe, aqalka sare Cabdi Xaashi Cabdullahi iyo mas'uuliyiin kale.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa sheegay in qaadasha kaarka aqoonsiga qaranka uu ahmiyad u leeyahay kobcinta amniga, sare u qaadida maamul wanaaga dowliga ah iyo ganacsiga.

Dhanka kale, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi oo isna ka hadlay ayaa sheegay in loo baahanyahay dardargelinta taageerada arrinkan isaga oo yiri ; Howshani waxaa ay taageero ka sugeysaa inta halkan jooqta iyo guud ahaan beesha caalamka, waana in aan awoodeenna isugu geyno sidii maalgelin dhaqaale iyo mid farsamo loogu heli lahaa si loo ballaariyo barnaamijkan, oo u gaaro dhammaan giyiga dalkeenna.

NIRA waxaa u qorsheysan in ay soo saarto 15 million oo kaarar aqoonsi ah kahor 2026-ka, waa han la xaqiijin karo marka la eego horumarrada degdegga ah ee hey'addani ku tilaabsatay 10-kii bil ee lasoo dhaafay,

tan iyo markii la ii xilsaaray Dib u yagleelideeda, Dib u eegista sharciga Aqoonsiga Qaran, Dib u dhiska qalfoofa hey'adda, dib u habeyn lagu samaeeyay habka maamul iyo hoggaanka.

Ka go'naanshiheenna arrinkan marna isma badalin, waxaanna diyaar u nahay in aan howl adag ka qabanno sidii u guulaysan lahaa, waxaa noo muuqata Soomaaliya oo iyada oo aan loo aaboyeeleyn qofka Soomaaliga ahi cidda uu yahay iyo meesha uu kasoo jeedo, muwaadin kasta heyso Aqoonsi Qaran, uuna qeyb ka noqdo marinka nabadda, xasiloonida iyo horumarka".

Hadda, waxaa socda dadaallo gobolka Banaadir looga bilaabay in ay dadka qaataan kaarar aqoonsiga iyada oo loogu geyn doono degmadda.



## Ra'isul Wasaare Xamsa Cabdi Barre oo khudbad ka jeediyay Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay

**R**a'isul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre oo kaqeybgalay kalfadhiga 78aad ee Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee magaalada New York ayaa jeediyay khudbad dheer uu uga hadlay arrimo badan oo Soomaali ah.

Ra'isul Wasaare Xamsa ayaa ka hadlay horumarka dowladda Soomaaliya ay gaartay dagaalka ay kula jirto kooxaha Khawaarijta oo u sheegay in dowladda Soomaaliya ay ku guuleysatay 45% inay xoreyso deegaannadii ay shacabka ku dhibaateynayeen, waxaa kale oo uu ku dheeraaday dadaalka ay dowladdu gelisay arrimaha horumarinta bulshada.

Mudane Xamsa ayaa codsaday in Golaha Ammaanka ee Q.M. uu ka qaado cunaqabateynta mudada 30-ka sano ka badan saarneyd Soomaaliya, si dalkeenu uga guuleysto argagixisada, isla markaana ciidanka qaranka ay ula wareegaan guud ahaan ammaanka dalka.

Waxa uu sheegay in Soomaaliya ay dhibbane u tahay saameynta isbeddelka cimilada, oo dalkeena ay ka dhaceen abbaaro is dabajoog ah iyo fatahaado, isla markaana ay codsaneyso Soomaaliya in gacan la siiyo xal u helidda dhibaatooyinka ka dhasha qaaca hawada lagu sii daayo iyo isbeddelka cimilada.

Ra'isul Wasaare Xamsa Cabdi Barre, waxaa uu ugu dambeyn ugu baaqay dib u habeyn lagu sameeyo hey'adaha caalamiga ee adduunka oo ay ugu horreyso Qaramada Midoobay, Bangiyada Horumarinta iyo Nidaamka Guud ee D h a q a a l a h a Adduunka.

# Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka oo Daahfuray mashruuca ka jawaabista xaaladaha degdegga



Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, Mudane Saalax Jaamac, ayaa daah-furay mashruuca ka jawaabista xaaladaha degdegga iyo kasoo kabashada xasaradaha Soomaaliya, iyaga oo goobjoog ka ahaa Wasiiru dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Sadad Alio iyo Guddoomiyaha hey'adda SoDMA.

Munaasabadda oo sidoo kale ay goobjoog ka ahaayeen saxiibada Soomaaliya ayaa mashruucan lagu daahfuray waxaa uu wax weyn ka tari doonaa ka jawaab celinta xasaradaha deg-degga ah iyo soo bandhigidda baahiyaha maal-gelineed ee Xarunta Qaran ee howl-gallada gurmada deg-degga ah, taas oo qayb ka ah Hay'adda Maareynta Musiibooyinka ee (SODMA).

## Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Soomaaliya ayaa Ansixiyay Hindise Sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangalyo

Aqalka Golaha Shacabka ee baarlamaanka Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa ansixiyay xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo doonka oo maray akhriska 3-aad.

Codaynta loo qaaday waxaa ka aamustay lix xildhibaan, waxaana diiday hal halka ay ogolaadeen ilaa 134 xildhinaan.

Wasiiru dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Xildhibaan Saadaad Maxamednuur Caliyow ayaa ugu dambeyntii uga mahadceliyay xildhibaannada qaranka anisixinta hindise sharciyeedkan wax badan ka tari doona horumarinta xaaladda qaxootiga iyo magangalyodoonka.



# Mas'uuliyiin uu ugu Horreeyo Ra'isul Wasaare Xamse Barre oo

## Kaqeybgalay Shir Weynaha Aqoonsiga Qaran oo 2 maalin Socday



qofka Soomaaliga haddii uu sheegan jiray reerkiisa iyo beeshiisa, maanta waxaa la taagan yahay inuu dhaho “Anigu waxan ahay Soomaali”. “Aqoonsiga dadweynaha, waxa uu halbowle u yahay dowladnimadeena, maanta oo loo dabaaldegayo maalinta aqoonsiga dadweynaha ee adduunka, waxaa guul u ah shacabka iyo dowladda Soomaaliya inan u saldhignay nidaamkaas, waxan daahfurayaa shirweynaha Aqoonsiga Qaran” ayuu intaasi raaciyay.

Ugu dambeyntii, ra'isul wasaare Xamse Barre waxaa uu sheegay in kaarka aqoonsiga dartii maalintaas laga bilaabo ay suuragal noqoneyso in shacabka Soomaaliyeed ay helaan xuquuqdooda dastuuri ah.

waxaa uu u mahadceliyay dowladda Pakistaan, Bangiga adduunka iyo cid walba oo gacan ka geysatay.

Dhankiisa, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallim Fiqi oo shirka uga qeybgalay qaab muqaal ah ayaa ka hadlay ahmiyadda kaarka iyo heerarka uu soo maaray.

Waxaana hadalladiisa ka mid ahaa; Daahfurka Barnaamijka Aqoonsiga Qaranka waxaa uu tusaale cad u tahay in meel fog aan uga nimid nabadda iyo xasilloonida Soomaaliya. Waxaa kale oo aan la dhayalsan karin raadka uu barnaamijka Aqoonsiga Qaran ku yeelanayo baraaraha qaranka.

**R**a'isul Wasaaraha Xukuumadda Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliya mudane Xamze Cabdi Barre ayaa Muqdisho ku daahfuray Shir Weynaha Aqoonsiga Qaran, waxaana labada maalin ee shirku socday ka qeybgalay mas'uuliyiin ka socotay xukuumadda federalka ah, baarlamaanka federalka, dowlad goboleedyada, bulshada rayidka ah iyo qeybo kale.

Mudane Ra'isul Wasaare Barre oo ugu horreyn daahfurka ka hadlay waxaa uu yiri “Maanta waa maalinta Aqoonsiga Dadweynaha ee caalamka, sidoo kale waa maalin uu qofka Soomaaliga ah ka jawaabayo qofmaa tahay,



Xuquuqda Dastuuriga: Waxaa kale oo Aqoonsiga Qaran uu muwaadinka u suurogelinayaa in uu helo xuquuqdiisa dastuuriga ah; oo Kaarkani Aqoonsiga Qaran waa midka lagu diiwaangelinayo cod bixiyaha, taasi oo suurogal ka dhigeysa in shacabkeennu ay si dimoqoraadi ah u doortaan dadkii ku matali lahaa goleyaasha kala duwan.

Labada maalin ee shirku socday waxaa khudbado kasoo jeediyay mas'uuliyiin ay ka mid ahaayeen; Wasiirka Waxbarshada mudane Faarax Sheekh Cabdiqaadir, Marwo Fardowso Cismaan Cigaal, Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duuliska Hawada, Cabdiweli Cabdullaahi Timacade oo ah Maareeyaha guud ee NIRA, Kuxigeenka hey'adda Cabdullahi Biixi iyo mas'uuliyiin kale oo ka socotay dalka Pakistaan iyo hey'adaha Qaramada Midoobay. Dhammaan waxaa ay ka ahadleen ahmiyadda shirka, faa'idooyinka qaadashada kaarka aqoonsiga qaran iyo sooyaalka la xiriira arrimahan.

Ugu dambeyntii, waxaa shirka soo xiray Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Mudane Sheikh Aadan Maxamed Nur Madobe.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa uu dadweynaha Soomaaliyeed ugu baaqay in ay qaataan kaarka aqoonsiga, kaasi oo wax badan Katari doona



**M**udane Axmed Macallim Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya waxaa uu soo qaatay ahmiyadda kaarta isaga oo ka yiri; Abuurista Kalsoonida: Barnaamijkan Aqoonsiga Qaranku waxaa uu keenayaa dhismaha kalsooni dhexmarta Xukuumadda iyo Shacabkeeda. Waxaa uu tusinayaa sida ay nooga go'antahay isla xisaabtanka iyo hufnaanta oo labaduba muhiim u ah dadaallada aan ku bixinayso Dibuheshiisinta iyo Dowlad dhiska. Xoojinta Dadaallada Xasillinta: Aqoonsiga Qaranku waa hannaan wax badan ka taraya dagaalka ka dhanka ah Argigixisada, gaar ahaan Kooxda Shabaab.

Waxaa uu wataa dareen lahaanshiyo dal iyo in la garto muwaadiniinta, waxaa kale oo uu xoojinayaa xiriirka dowladda iyo shacabkeeda, taasi waxaa ay wax badan ka tari doontaa dadaallada aan wax uga qabanayno goobaha ay colaadaha ka jiraan.

Adeeg bixinta: Kaarka Aqoonsiga waa plastic, balse heysashadiisa waxaa lagu helayaa dhammaan adeegyada asaasiga ah sida; Caafimaadka, Waxbarashada, Doorashooyinka iyo fursado dhaqaale. Hellida Qof kasta oo Soomaali ah kaar aqoonsi qaran oo u gaar ah, waxaan u suurogelinaynaa in ay qeyb ka noqdaan horumarka iyo barwaaqada dalka.



# Xarardheere: Wasiir Fiqi oo Booqday Isbitaalka, iskuulka, sladhigga degmada iyo meelo kale.

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi oo uu wehliyo mudane Cabdiraxmaan Cagaweyne oo ah xildhibaan ka tirsan golaha shacabka ee BF iyo maamulka degmada Xarardheere ayaa kormeeray goobo badan oo loogu adeego bulshada sida Isbitaalka, iskuulka, sladhigga degmada iyo meelo kale.

Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Mas'uuliyiinta la socotay waxaa ay u kuurgaleen xaaladda goobahaasi iyaga oo dhageystay qaabka shaqo, baahiyada adeeg ee jirta iyo sida wax looga qaban karo.

Dhammaan goobaha la booqday waxaa ka muuqatay dib u howlgelin iyo dayactir lagu sameeyay Shabaab kadib, waxaase u dhimman qalabeyn, tayeyn iyo arrimo badan.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya oo la hadlay maamullada kala duwan ee goobaha uu booqday ayaa ku bogaadiyay shaqada adag ee ay degmada u hayaan, haddii ay ahaan lahayd dhabibidda bukaanno meelo fog laga keenay, caruur xilli adag wax baraneyso iyo saldhig degmada oo wax badan ka tari doona amniga.

Dhanka kale, Mudane Axmed Macallim Fiqi, wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta waxaa ballanqaaday in ka dowlad ahaan ay gacan weyn ka geysan doonaan horumarinta goobaha adeegga bulshada, hortabinna ay u tahay xukuumadda Dan Qaran iyo barnamijyadeeda Xasillinta sidii loo dabooli lahaa baahiyada deegaannada la xoreeyay iyo kuwa la xoreynayo.

Wasiirka Arrimaha Gudaha mudane Ahmed Moallim Fiqi ayaa booqasho shaqo kujooga Galmudug isaga oo abaabul ka dhan Kħawarijta ka wada deegaannada kala duwan ee Galgaduud iyo Mudug.





## **Mudug: Wasiir Fiqi oo Kulan Gaar ah la Qaatay Macawisleyda Beesha Saruur**

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi oo howlo abaabul bulsho iyo ciidanba ka wada degmada Xarardheere ee gobolka Mudug ayaa Kulan dhiiragalin ah la qaatay ciidamada difaaca deegaanka ee Beesha Saruur.

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu ku ammaanay ciidamadaasi sida geesinnimada leh ee deegaankaas uga xoreeyeen cadowga Khawaarijta isaga oo ku adkeeyay diyaargarowga dhameystirka xoraynta goobaha ay weli kusii dhuumaaleysanayaan haraadiga Khawaarijta ee Mudug.

## **Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya oo Dhiirigeliyay Ciidamada difaaca deegaanka ee Beesha Saleebaan.**

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi oo ku sugan degmada Xarardheere ee gobolka Mudug ayaa Kulan dhiiragalin ah la galay ciidamada difaaca deegaanka ee Beesha Saleebaan.

Mudane Axmed Fiqi, Wasiirka arrimaha gudaha ee Soomaaliya ayaa ku bogaadiyay ciidankaasi sida nafhurnimada leh ee ay uga adkaadeen Khawaarijta isaga oo ku dhiirigeliyay dhameystirka halganka socda iyo in laga shaqeeyo sidii Mudug oo dhan looga sifeyn lahaa haraadiga cadowga Khawaarijta.



## Agaasime Caydaruus oo Soo Xiray Shir Looga Arrinsaday Madasha Caalamiga ah ee Arrimaha Qaxootiga 2023

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Cayduruus Macallin ayaa soo xiray Shirka Wadatashiga ee u diyaar garowga Madasha Caalamiga ah ee Arrimaha Qaxootiga 2023 oo ay soo agaasintay Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

Shirkan oo magaalada Muqdisho ka socday muddo 3 cisho ah ayaa waxaa kasoo qaybgalay Madax ka kala socotay Dowlad Goboleedyada Dalka, Gobolka Banaadir, Guddiyada Qaxootiga iyo Urur Gobeedka IGAD.



## Wanane: Beesha Waceysle oo Wasiir Fiqi Uga Waramay Diyaargarowga Ladagaalanka Khawaarinta

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi ayaa booqasho iyo dhiirrigelin ugu tagay Macawislayda beesha Waceysle ee ku sugan deegaanka Wanane.

Deegaankan oo ka tirsan degmada Xarardheere ee Mudug ayey ku kala warqaateen Wasiir Axmed Fiqi iyo qeybaha bulshada deegaanka oo ay ku jiraan odeyaasha dhaqanka iyo xaq udirirka Macawislayda.

Odeyaasha deegaanka iyo Macawislayda beesha Wacaysle oo warbixin siiyay Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya ayaa muujiyay diyaar garowgooda ku aadan ladagaalanka Khawaarijta iyaga oo ka dalbaday dowladda gacansiin dhan walba ah.

Dhankiisa, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi waxaa uu bogaadiyay sida geesinnimada leh ee ay ula dagaaleen cadowga Khawaarijta isaga oo carabka ku adkeeyay in dowladda Soomaaliya ay garab siiso dhammaan bulshooyinka ku gadooday dowlad diidka Khawaarijta, garab istaag iyo dhiirrigelinta uu ugu yimid, iyaguna laga rabo in ay u horkacaan baacsiga haraadiga Khawaarijta.

# Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya Mudane Fiqi oo Qaatay Kaarka Aqoonsiga Qaranka



Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha (NIRA) ayaa degmada Xarardheere ee gobolka Mudug ugu sameysay Diiwanagalinta kaarka aqoonsiga qaranka Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi. Tallaabadan ayaa timid uun Kadib laba maalmood daahfurka aqoonsiga qaran.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya oo arrinkan ka hadlaya ayaa bogaadiyay howlwadeennada NIRA isaga oo yiri “ Hey'adda NIRA waxay heysataa hawladeenno lagu aamini karo shaqadan muhiimka iyo qalab casri ah oo hawsha fududeynaya”

“ Waxaan bogaadinayaa mar kale madaxda hey'adda iyo Bahda NIRA, waxaana u rajaynayaa in ay guulaystaan” ayuu hadakiisa kusoo gabogabeeyay Waxaa xusid mudan in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JFS ay lahayd kaalinta Dib u yagleelidda Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta ee NIRA, Dib u eegista sharciga Aqoonsiga Qaran, Dib u dhiska qalfoofa hey'adda, dib u habeyn lagu sameeyay habka maamul iyo arrimo kale kuwaas oo dhammaan maanta noqday mirodhal.





## Palermo: Wasiir Fiqi oo Kaqeybgalay Xuska 20 sano guurada heshiisiinta Q/M ee ka dhanka ah dambiyada abaabulan ee ka gudba Xuduudaha.

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi oo socdaal shaqo ku tagay dalka Talyaaniga ayaa uga qeybgalay magaalada Palermo shir heer wasiir ah oo lagu maamuusayay 20 sano guurada heshiisiinta Qaramada Midoobay ee ka dhanka ah dambiyada abaabulan ee ka gudba Xuduudaha.

Shirkan oo labo maalin ahaa ayey hoggaamiyeyasha iyo khubarada kala duwan xoogga ku saareen arrimo ay ka mid yihiin; Ka ganacsiga dadka, tahriibka iyo tahriibinta iyo hannaanka ay tahay in looga hortago dambiyada ceynkaa ah ee ka dhaca Badda cad.

Dalalka kaqeybgalay ayaa is tusay ahmiyadda ay leedahay in laga hortago dambiyada abaabulan kuwaas oo khatar ku ah jiritaanka aadanaha iyo dalalka.



# Talyaanig: Mudane Fiqi oo Dhiggiisa Matteo Piantedosi Kala Hadlay Xiriirka Labada dal iyo Arrimo Kale



Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Amed Macallim Fiqi oo isafar shaqo ku tagay dalka Talyaaniga ayaa kulan mirodhal ah la qaatay dhiggiisa Talyaaniga mudane Matteo Piantedosi.

Ajendeyaasha kulanka waxaa ugu muhiimsanaa xiriirka labada dal iyo Wasaaradood iyada oo arrimo badan oo iskaashi ah la isla meel dhigay, waxaa kale oo laga hadlay dhibaata tahriibka iyo sidii loo xadidi lahaa dambiyada ka gudba xuduudaha.

Talyaaniga iyo Soomaaliya waa labo dal oo uu ka dhaxeeyo xiriir taariikhi ah, kulamadanna waxaa ay ka tarjumayeen horumarinta arrimahaasi.

## Wasiirka Arrimaha Gudaha oo USAID Kala Hadlay Qodobbo Muhiim ah

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS mudane Axmed Macallim Fiqi ayaa caasimadda Muqdisho kulan gogolxaar ah kula qaatay madaxa cusub ee hey'adda USAID ee Soomaaliya Sheri-Nouane Duncan Jones.

Inta uu kulanka socday arrimaha laga wada hadlay waxaa ka mid ah; wadashaqeynta labada dhinac, xaaladda arrimaha banii'aadnimada iyo diirad saaridda horumarrada kale ee la xiriira qaran dhiska.

USAID waa hey'ad ka shaqeysa arrimaha horumarinta iyo Bani'aadnimada, waxaana laga leeyahay dalka Mareykanka.





## Mudug: Wasiirka Arrimaha Gudaha oo Booqday Tuulooyinka sida Ceelqalow iyo Dur-dur

Wasiirka Arrimaha gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Mudane Ahmed Moallim Fiqi iyo wafdi uu hogaaminayo ayaa soo kormeeray deegaanno dhaca Koonfurta degmada Xarardheere iyada goobaha ay booqdeen ay ka mid ahaayeen tuulooyin sida; Ceelqalow iyo Dur-dur oo hoostaga magaalo xeebeedka Xarardheere.

Mudane Ahmed Moallim Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo wafdigiisa ayaa booqashooda waxaa ay saldhig u ahayd u kuurgalidda xaaladda deegaanadaas ee dhanka bulshada, horumarintooda, abaabulka iyo kor u qaadista wacyiga iyo dardargelinta gulufka ka dhanka ah cadowga Khawaarijta.

Bulshada deegaanadaas ayaa ka hadlay dhibaatooyinka ay ku hayeen kooxaha Khawaarijtu iyo iftiinka nolosha iyo dawladnimada ee ay heleen mudadii sideedda bilood ee la soo dhaafay, sidoo kalena Waxay soo bandhigeen baahiyada kala duwan ee ay qabaan sida iskuul iyo Isbitaal la'aan ka jirta deegaanadaas.

Dhankiisa, Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya mudane Ahmed Moallim Fiqi ayaa bogaadiyey kaalinta bulshada deegaanadaas ay ku lahaayeen halganka la isaga xoreeyey Khawaarijta iyo Sida ay ugu diyaarsan yihiin dhamaystirka iyo ciribtirka Khawaarijta, waxaa uuna hoosta ka xariiqay sida dowladda Soomaaliya ay uga go'antahay wax kaqabashada baahiyada dhammaan deegaannada la xoreeyay iyo kuwa la xoreynayo.

# Xarardheere: Wasiir Fiqi oo Maamulka iyo Bulshada Degmada Ka Dhageystay Baahiyada Jira

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiq ayaa magaalada Xarardheere kulan gaar ah la qaatay maamulka iyo qeybaha kala duwan ee bulshada degmada isaga oo dhageystay baahiyadooda, kalana hadlay heerka abaabulka, dardargelinta howlgallada lagu ciribtirayo Khawaarijta iyo arrimo kale.

Mudane Axmed Macallim Fiqi, wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu ugu horreyn dhageystay baahiyaha kala duwan ee kajira guud ahaan degmada, iyaga oo qeybaha goobjooga ahaa sida odeyaasha, dhalinyrada iyo haweenka degmada ay qeyb weliba hordhigeen wasiirka baahida u gaarka ah, dalbadana wax kaqabasho.

Dhankiisa, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta waxaa uu kala hadlay ajendaha dowladda ee xorreynta deegaannada Mudug ee ay weli kajoogaan haraadiga Khawaarijta isaga oo ku dheeraaday abaabullada kala duwan ee socda iyo mideynta dadaalada,

waxaa uuna adkeeyay sida loogu baahanyahay garab istaagga halganka Galmudug looga sifeynayo cadowga Shabaab isaga oo hadalkiisa kusoo gabagabeeyey in dowladda ay hortabin siin doonto hirgelinta mashaariic horumarineed oo laga fulinayo deegaannada la xoreeyay iyo kuwa la xoreynayo.



## Saldhigga iyo CID-da Degmada Xarardheere oo ay ka socdaan Howlo Amniga wax looga qabanayo

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi iyo mas'uuliyiin wehliisay ayaa booqday saldhigga iyo xarunta CID-da ee degmada Xarardheere.

Mudane Axmed Fiqi ayaa ugu horreyn la kulmay Kusimaha ahna taliye kuxigeenka saldhigga degmada Cabdi Maxamuud Salaad (Beylood) iyada oo laga hadlay dardargelinta sugidda amniga degmada, bedqabka muwaadiniinta, sifeynta haraadiga Khawaarijta, isku xirnaanta saldhigga iyo bulshada iyo arrimo kale.

Wasiirka iyo wafdiga la socday waxaa kale oo ay la kulmeen taliyaha CID ee degmada Xarardheere Xamdi Ceyrow iyada oo wasiirka iyo mas'uuliyiinta la socotay warbixin ka siiyay falalka dambi ee ka dhaca degmada, baarista dacwooyinka iyo isla shaqeynta hey'adaha kala duwan.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallim Fiqi waxaa kormeerka ku wehliyey Guddoomiyaha gobolka Mudug ee Galmudug, taliyaha saldhigga ee degmada Hobyoo iyo taliyeyaasha guutooyinka 3-aad iyo 6-aad ee Ciidamada Gorgor, waxaa uu bodaaiyay howlaha baaxadda leh ee socda, isaga oo u xaqiijiyay mas'uuliyiinta uu la kulmay in dowladda Soomaaliya ay sida ugu dhaqsiyaha badan u qalabeyn doonto xarumahaasi.







## Shabeelow: Muidane Axmed Macallim Fiqi oo Booqday Furimaha Dagaalka

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi ayaa si uu ugu kuurgalo xaaladda guud, waxaa uu booqday furinta dagaalka ee Shabeelow, oo ka mid ah deegaannada lagu baacsanayo haraadiga Khawaarijta Shabaab.

Ciidamada kala duwan ee ku sugan aagga dagaalka ayaa uga warbixiyay Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya dagaaladdii ugu dambeeyay iyo heerka khasaaraha cadowga iyaga oo u xaqiijiyay in haraadiga Khawaarijta Shabaab ay ku jiraan rafasho, gabbaadna aaney heysan, kuna soo gabagabeyn doonaan waqti kooban.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallim Fiqi waxaa uu geesiyaasha ciidanka ku ammaanay guulaha ay ka gaareen dagaaladdii ugu dambeeyay isaga oo ku adkeeyay sida dowladda Soomaaliya uga go'antahay soo afjarista Khawaarijta si horumar iyo barwaaqo u helaan shacabka deegaanka iyo guud ahaan umadd Soomaaliyeed.



## Xarardheere: Mudane Fiqi Oo Goobjoog ka ahaa Munaasabad ay Dhalinyaro reer Muqdisho ah Buugaag ugu Deeqeen Degmada

Wasiirka Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi, maamulka degmada Xarardheere, xildhibannada baarlamaanka Federaalka ah iyo saraakiisha ciidamada xoogga dalka Soomaaliyeed ayaa goobjoog ka ahaa munaasabad ay dhalinyaro ka baxday caasimadda Muqdisho agab waxbarasho ugu deeqeen iskuulka degmada Xarardheere.

Dhallintan oo iskood isku abaabulay ayaa 100 buug oo ah isugu jira manhajka qaran ee waxbarashada dugsi hoose/dhexe ugu deeqay ardayda degmadan dhawaan laga xoreeyay Khawaarijta.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallim Fiqi ayaa bogaadiyay tallaabada ay ku dhaqaaqeen dhallinyradan, isaga oo sheegay in ay tahay mid kudayasho mudan, loona baahanyahay in deegaannada la xoreeyay lagu garab istaago marxaladaha horumarinta iyo kasoo kabashada waxyeeladdii Khawaarijta.





## Garoonka Xarardheere oo Khawaarijta Kadib Ku Cayaareen Gorgor iyo Xulka Degmada iyo Mudane Fiqi oo u Daawasho Tagay

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi ayaa ka qeybgalay ciyaar kubadda cagta ah oo u dhaxeysay koox matalaysay Gorgor oo ka tirsan ciidamada xoogga dalka iyo ciyaartoyda ka socotay degmada Xarardheere ee gobolka Mudug.

Cayaarta oo aad u xiiso badnayd, ayna usoo daawasho tageen qeybaha bulshada iyo maamulka degmada Xarardheere ayaa kusoo dhamaatay 1-0 oo ay ku adkaatay Kooxda Ciidanka XDS ee Gorgor.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Ahmed Moallim Fiqi oo dhammaadkii kulanka la hadlay shacabka ayaa uu ugu horreyn bogaadiyay isdhexgalka iyo kalsoonida ka dhaxeysa ciidamada xoogga dalka Soomaaliyeed iyo bulshada Xarardheere, isaga intaa raaciyay in wadajirkoodu ahaa midda degmada looga xoreeyay Khawaarijta haddana lagu raadjoogo haraadigooda.

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu dadka deegaanka ugu baaqay in lala shaqeeyo naftood hurayaasha xoogga dalka kuwaas oo har iyo habeen u taagan difaaca, dalka, dadka iyo diinta.



## Wasiiru dowlaha Wasaaradda oo Guddoomiyay Kulan Looga Tashtay madasha caalamiga ah ee arrimaha qaxootiga.

Wasiiru dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Saadaad Maxamednuur Caliyow ayaa shir guddoomiyay kulanka wadatashiga qaran ee u diyaar garowga madasha caalamiga ah ee arrimaha qaxootiga.

Kulankan oo ay soo abaabushay hey'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyo guddoomiye Marwo Safiya Xasan Maxamed ayaa waxaa kusoo qeybgalay mas'uuliyiin ka socotay wasaaradaha kala duwan ee Federaalka ah <

sida Arrimaha Gudaha, Amniga, Cadaaladda, caafimaadka, waxbarashada iyo deegaanka iyada oo sidoo kale oo qeyb ka ahaayeen dowlad goboleedyada, gobolka Banaadir, bulshada rayidka ah iyo xubnaha beesha caalamka.

Inta uu shirkan socday waxaa ay kaqeybgalayaashu dib u eegis ku sameeyeen qaab fulinta balanqaadyadii 2019-kii iyaga oo sidoo kale laga hadlay dhameystirka ballanqaadyada cusub ee December 2023.

## Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Ashkir oo Kaqeybgalay Tababar Xiriirka ah oo ay Wasaaraddu u Qabatay Hey'adaha Hoostaga



Tababar la xiriira Israatiijiyadda xiriirka iyo warbaahinta oo afar maalin socday oo wasaaraddu u qabay hey'adaha hoos taga ayaa waxaa daahfuray Wasiir kuxigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Abdihakim Ashkir , waxaana soo xiray Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Caydurus Macallin Xasan

Tababarkan ayaa waxaa loo qabtay isla markaana ka faa'idaystay waaxyaha xiriirka iyo warbaahinta ee Hay'adaha hoos taga Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya sida Hey'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha qaranka, Hey'adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha iyo Hey'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka.

Tababarkan inta uu socday ayaa waxaa lagu qaatay casharro kala duwan oo kor u qaadaya tayada shaqada xafiisyadaasi.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda oo Furay Aqoon Isweydaris La xiriira Dimuqraadiyadeynta iyo Nabad Dhiska



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Caydurus Macallin Xasan ayaa furay Aqoon Isweedaarsi la xiriira Dimuqraadiyadeynta iyo Nabad Dhiska oo ay soo agaasintay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS.

Aqoon isweedaarsiga la xiriira Arrimaha Dimuqraadiyadeynta iyo Nabad Dhiska ayaa loo qabtay Howl-wadeenno ka kala socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS, Guddiga Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka, Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha, Wasaaradda Caddaalada iyo Arrimaha Dastuurka XFS, Xafiiska Raysal wasaaraaha XFS iyo Xafiiska Madaxwaynaha JFS.

## Maxamed Muumin oo Noqday Agaasimaha waaxda Diiwaangelinta Hay'addaha aan dowliga aheyn

Mudane Maxamed Muumin Sugow ayaa ku guulaystay xilka Agaasimaha waaxda Diiwaangelinta Hay'addaha aan dowliga ahayn ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib U Heshiisiinta kadib tartan ay Wasaaraddu u qabatay ilaa 5 ka tirsan howlwadeenadeeda.

Warbixin kasoo baxday guddiga qiimaynta ayaa lagu caddeeyay in Maxamed Sugow uu ahaa mudanihihi ugu sareeyay imtiixanka guud iyo qiimayntii laga qaaday Shan (5) howl-waddeen oo kamid ahaa wasaaradda, kuwaas oo ku tartamayay jagada Diiwaangelinta Hay'addaha aan dowliga ahayn ee Wasaaraddu soo bandhigtay sidaa darteedna uu noqday Agaasimaha waaxda Diiwaangelinta Hay'addaha aan dowliga ahayn ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib U Heshiisiinta.

Hoggaanka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya ayaa u hambalyeeyay Agaasimaha Cusub, waxaa uuna rajeynayaa in howlaha qaran u guto si hufan, oo waafaqsan shuruucda dalka.





## **Xarardheere oo Lagu Daahfuray Barnaamijka Bilic soo celinta Magaalada**

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi ayaa Xarardheere ka daahfuray barnaamijka Bilic soo celinta magaalada iyada oo ay qeyb ka tahay ka nadiifinta Geedka Caligaroobka oo magaaada si baahsan ugu baxay.

Barnaamijkan oo ah maalgelisay TIS ayaa la mid barnaamijka Xasillinta, waaxaa uuna kusoo aadayaa xilli ay Xarardheere galayso Dib u dhiskeeda Khawaarijta kadib.

Hadal kooban oo uu jeediyay Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi waxaa uu ku sheegay in loo baahan yahay ilaainta bedqabka bulshada iyo in lala dagaalamo maandooriyaha.

## **Masaajidka Xarardheere oo Isku Badaly Minbar Lagu Gudbiyo Farriimaha Dowladnimada**

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Ahmed Moallim Fiqi ayaa Masjidka ugu weyn degmada Xarardheere kula tukaday shacabka salaadda Jimchaha.

Khudbad kooban uu mudane Axmed Fiqi kajeediyay masaajidkan ay bilo kahor Khawaarijta farriimo guracan ka faafin jireen waxaa uu ku dheeraaday heerka abaabulka bulshada ee diyaargarowga howlgallada ka dhanka ah Khawaarijta isaga oo adkeeyay baahida loo qabo in bulshada laga wacyigeliyo khatarta nabad diidka, iyada oo ay hormuud ka yihiin indheergaradka umadda sida culimada.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Ahmed Moallim Fiqi waxaa shacabka Xarardheere la wadaagay sida dowladda Soomaaliya ay uga go'antahay xorreynta deegaannada Galmudug iyo dhameystirka haraadiga Khawaarijta, bulshadana laga doonayo garab istaagga ciidanka.



## Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo Ku Daahfuray soo

### bandhigidda natiijada qiimeynta barnaamijka (I-Stand) ee Xasillinta.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Caydaruus Macallim Xasan ayaa ku daahfuray caasimadda Muqdisho munaasabadda soo bandhigidda natiijada qiimeynta barnaamijka (I-Stand) ee Xasillinta.

Khudbad kooban oo uu halkaasi kasoo jeediyay agaasime Caydaruus waxaa uu bogaadiyay shaqada qiimeynta ee dib loo eegayay howlihii laga qabtay barnaamijkan, taasi oo wax badan ka qaban doonta isla xisaabtanka, isla markaana dhiirigelineysa in wax laga barto qaladaadkii jiray, lagana fogaado soo laabashadooda mustaqbalka.

Iskuduwaha Barnaamijka Xasillinta ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta Mud. Ramadaan Cilmi oo isna ka hadlay bandhigga qiimeynta lagu sameeyay barnaamijka xasillinta ee (I-Stand) ayaa sheegay inuu barnaamijkan iyo mashaariicda kala duwan ee la fuliyay ay muhiim ahaayeen, gaar ahaan dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha kuwaas oo wax badan ka qabtay kor u qaadista noloshada dadka ee dhinacyada kala duwan, qeybna ka qaatay isdhexgalka bulshada, arrimahaasi oo aaney qabsoomi lahayn haddii aan taageero laga helin saxiibada caalamiga.

Madasha waxaa kale oo lasoo bandhigay Qiimeynta lagu sameeyay iyo natiijada qiimeynta barnaamijka (I-Stand) ee Xasillinta, iyada oo qeyb ka ahaayeen warbixinta qaabkii qiimeyntan loo sameeyay, goorta iyo goobaha lagu sameeyay, nooca dadka ka qeybgalaya, sida ay mashaariicda kala ahaayeen, ka jawaabista baahiyada, samaeyntooda iyo natiijada oo inta badan ka hadlaysay guulaha la gaaray.





# Sawirka Bisha

[www.moifar.gov.so](http://www.moifar.gov.so)